Rajiistarka Noorweeyaanka QA ee Dhagaha Sanka iyo dhuunta – Rajiistarka Qalliinka Quunka (Somali)

Ogolaasho – Codsasho diiwaangelinta Rajiistarka Qallinka Quunka ee Qaranka:

Ujeedo iyo waxii ka dambeeyo

Tani waa codsasho lagaa codsanaayo inaad is ka diiwaangelisid Rajiistarka Qalliinka Quunka ee Qaranka. Daaweeynta qanjirada dhuunta waa nidaam ka mid ah kuwa ugu badan ee caruurta iyo dhalinyarada Noorway waxaana la sameeyaa ilaa iyo 10.000 oo qaliin sanadkiiba. Quunka waa lawada saari karaa (=tonsillectomy) ama waxaa a saari kaari karaa qayb (=tonsillotomy). Qayb la saareyaasha waa kuwa ugu badan.

Quunka caadi ahaan waxaa loo saaraa labo sababood:

1. Quun joogto ah/mid soo noqnoqda
2. Markii uu quunka balaartay dhibaato ku noqdo liqida iyo hawo qaadashada , hurdo yarid, daal iyo feejignaan xumo waqtiga maalinta.

Si daaweynta loogu deeqayo sida ugu wanaagsan ee suuragalka ah u noqoto, macluumaad badan oo ku saabsan kooxaha bukaanka baa loo baahan yahay iyo diiwaangelinta way caawinaysaa. Diiwaangelinta Rajiistarka Qalliinka Quunka ee Qaranka waa mid ikhtiyaar ah oo u baahan wargelin ogolaasho ah. Taas macnaheedu waa inaad baaq ogolaasho ah saxiixdaa si aan Rajiistarka kuu diiwaan gelino.

Rajiistarka waxaa lagu qori doonaa macluumaadka hoos ku qoran:

Macluumaadka lagu duubaayo Rajiistarka waxaa ku jira magacaaga, lambarkaaga shakhsi ee aqoonsiga, iyo macluumaadka laga helay shaybaarka iyo daaweynta. Macluumaad kale sida qalabka qalliinka loo isticmaalay intii a hawshu socotay, waxii dhibaato oo gadaal ka yimaada iyo hadii cabashooyinka laga hadlay la duubay la diiwaangelinaayo. Baaritaanka dhiiga iyo baaritaanada kale maahan kuwo si joogto ah loo sameeyo oo la xiriira daaweeynta.

Xafiiska dawlada dhexe ee gobolka ee Noorway baa ka masuul ah dhowrida macluumaadka ku qoran Rajiistarka. Macluumaadka waxay u duuban yihiin si elektoroonik ahaan iyagoo laga ilaalinaayo cidii aan shaqo ku lahayn.

Xafiiska dhowrida macluumaadka ee Noorway baa amar bixiyay in kaydinta macluumaadka Rajiistarka lagu hirgeliyo sida waafaqsan xeerarka ay dawladu soo saartay. Macluumaadka la ururiyay oo dhan waxaa loo isticmaalayaa si aamin ah. Qof kasto oo Rajiistarka macluumaadka ku shaqaynaayo waxuu ku qasban yahay inuu waxii aqriyo ama dhageysto oo dhan si aamin ah ugu dhaqmo.

Macluumaadka lasoo ururiyay waxaa laga heli karaa qaybta/cusbitaalka ku daaweeyay.

Halkee baa macluumaadka laga soo uruurinayaa?

Si loo helo daaweyn tayo leh, waxaan u baahan nahay macluumaadkaaga ka hor in ta aan lagu daaweyn, markii laguu daawaynayo iyo markii lagu daaweeyo kadib. Macluumaadka waxaa soo uruurinaaya wareesteyaal iyo wada hadalo qallinka kahor dhanka telefoonka, warqada ama elektoroonik ahaan 30 maalmood iyo lix bilood kadib, hadba siday tahay. ***Waxad helaysaa fariin boosto oo dijitaal ah oo ka socota helsenorge.no ama E-Mail ahaan, iyo fariin qoraal oo ka socota warbixinta natiijada bukaanka qaranka. Waa muhiim in aad su´aalaha oo dhan ka jawaabtid.***

Xaqa kormeerka, bedelida iyo bedelida macluumaaka

Waxaad kormeeri kartaa macluumaadka kasto oo kamid ah waxii lagaa duubay adiga ee kugu saabsan waqti kasta oo ay tahay. Intaa waxaa dheer, waxaad xaq u leedahay inaad saxdo khaladaad kasta ee macluumaadka aan ku diiwaangelinnay Rajiistarka. Waxa kale oo aad dalban kartaa in macluumaadkaaga diiwangelinta laga tirtiro diiwaanka adigoon wax sabab ah sheegin. Dhowrida xogta kuma jiri doonto in la tirtiro feylasha cilmi baarista aan la ogayn qofkii ay ku saabsan yihiin oo hore loo adeegsaday cilmi-baaris. Barnaamijka daaweynta ma saameyn doono haddii aad diido inaad isdiiwaangeliso ama aad dooratid inaad dib ugu noqoto go`aankaaga.

Rajiistarka Noorweeyaanka QA ee Dhagaha Sanka iyo dhuunta – Rajiistarka Qalliinka Quunka (Somali)

Macluumaadka laga helo Rajiistarka waxa keliya lagu bixindoonaa qaab aan la garan karin ah. Taasi waa, dhammaan macluumaadka waa la maareyn doonaa iyada oo aan lagu qorayn magac iyo lambar aqoonsi oo shakhsi ah ama macluumaad kale oo la garan karo. Lambarka furaha wuxuu kugu xirayaa macluumaadkaaga liiska magacyada. Shaqaalaha kaliya ee la ogol yahay waxay ku xiran yihiin diiwaanka. Waxay heli karaan liiska magacyada waxayna kugu xirayaan adiga. Ujeedada cilmi baarista, waxay noqon kartaa lagama maarmaan in la isbarbardhigo xogta diiwaanka macluumaadka kale ee diiwaanka caafimaadka ee isbitaalka iyo diiwaanada soo socda: Diiwaanka Bukaanka Noorway, Diiwaanka Caafimaadka Dhalashada Norway, Diiwaanka Dadka Noorwiijiga, Diiwaanka qorida Daawada Noorwiijiga Diiwaanka Cancer, Nidaamka Noorwiijiga ee Diiwaangelinta Dhimashada, SSB, Maamulka Shaqaalaha iyo Nafaqada ee Norway (NAV) iyo sahaminta dadweynaha waxaa ku jira Conor (Cohort of Norway), Sahannada Caafimaadka Qaranka iyo Sahanka Caafimaadka Waqooyiga Norway. Xiriirka Diiwaangelinta Bukaanka Noorwiijiga iyo Diiwaanka Daawada qorida Daawada Quunka

Cooperation has been established with Nordic Tonsil Surgery Registers. Comparison with anonymised datasets is planned once per year, in addition to the implementation of international research based on the various registers.

Warbixinta qaran ee sanadlaha oo laga soo saaro Rajiistarka waa la diyaarinayaa oo waxaa loo soo bandhigayaa dadwaynaha iyagoo ka arki bogga interneetka. Natiijooyinka waxa lasii faafinayaa kulanka takhasusayaasha iyo kulamada qaranka iyo caalamiga. Suurtagal ma noqon doonto in la isku xiro natiijooyinka ku salaysan falanqaynta macluumaadka diiwaanka ee shakhsiyaadka gaarka ah.
Waxii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Rajiistarka iyo macluumaadka ku qoran Rajiistarka waxaa laga arki karaa www.kvalitetsregistre.no

Dhamaan mashaariicda cilmi-baarista waa in horay looga ansixiyaa Guddiga Goboleedka ee Caafimaadka Cilmiyeed iyo Caafimaadka Cilmi-baarista (REC) iyo xafiisyada kale ee dawladda, sida sharcigu dhigayo. Macluumaad ku saabsan mashruuc ayaa laga heli doonaa website-ka mar haddii la ansixiyay.

Waxii macuulaad dheeraad ah oo ku saabsan Quunka, waxaa kuula talinaynaa inaad eegtid www.halsmandeloperasjoner.no

Waajibaadka diiwaangelinta / qofka lala xiriirayo:

Maamulaha farsamada:
Vegard Bugten
E-mail: vegard.bugten@stolav.no

Isku dubaridaha Rajiistarka:
Siri Wennberg
E-mail: siri.wennberg@stolav.no

Ciwaanka boostada:
Norsk Kvalitetsregister Øre-Nese-Hals – Tonsilleregisteret
St. Olavs Hospital HF
MTFS
3250 Sluppen
7006 Trondheim